HELSIŃSKA FUNDACJA PRAW CZŁOWIEKA

# HALKAN MAXAAN KA QABANAYAA?

## WARQAD DAABACAN OO AY KU QORAN TAHAY HAYNTA IYO KU MEELAYNTA XARUNTA LAGU ILAALIYO AJAANIBTA AH CARRUURTA IYO DHALINYARADA AAN LALA SOCON

Waxaa maalgeliyey Midowga Yurub. Aragtida iyo fikradaha lagu muujiyey waa kuwa qoraha/koolayaasha oo keliya, mana aha in ay si khasab ah u metelaan aragtida Midowga Yurub ama Hay'adda Fulinta ee Waxbarashada iyo Dhaqanka Yurub (EACEA).

## WAA MAXAY SABABTA LAGUU HAYO?

Waa macquul inaadan haysanin dukumentiyada saxda ah ee lagu soo galo ama lagu joogo Poland, ama inaad sawir kaliya ka hayso (tusaale, dal-ku-gal ama baasaboor).




Ciidanka **Xuduudka ilaaliya ayaa laga yaabaa inay ku hayaan muddo dhan ugu badnaan 48 SAACADOOD**

Inta lagu hayo, waxaad leedahay xuquuqahan soo socda:

- waxaad xaq u leedahay inaad ogaato sababta laguu hayo iyo in lagu dhagaysto
- waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto qareen (haddii aadan awoodin inaad qabsato qareen, waxaad heli kartaa gargaar sharci oo bilaash ah: codso in tan lagu qoro warbixinta xabsiga)
- waxaad xaq u leedahay inaad hesho kaalmo bilaash ah ka hesho qof turjumaan ah. Haddii aadan fahmaynin turjumaanka, isla markaaba sheeg arintan! HA SAXIIXIN DUKUMENTIYO AADAN FAHMAYNIN
- waxaad xaq u leedahay inaad u sheegto dadka qaraabadaada ah
- waxaad xaq u leedahay inaad hesho warbixinta xabsiga lagugu hayo
- waxaad xaq u leedahay inaad hesho kaalmada caafimaad ee aad u baahan tahay.

Haddii aad aaminsan tahay in haynta lagu hayo ay ku xadgudubtay xuquuqdaada, waxaad racfaan ka xaraysan kartaa maxkamadda7 Maalmood udahood iyadoo laga tirinayo waqtigii lagu qabtay.

Waxaad xaq u leedahay in si degdeg ah laguu sii daayo haddii aad si sharci ah u imaatay Poland ama haddii ay jiraan sababo kale oo xadhiggaagu yahay mid aan sabab lahayn.

**48 SAACADOO** gudahood Ciidanka Ilaaliya Xuduudaka waxay codsi u gudbin karaan maxkamadda si ay kuu geyso xarunta lagu hayo dadka aajinbta ah.

Laguuma gudbin karo xarunta dadka lagu hayo haddii:

1) Aad ka yar tahay 15 sano;

2) Aad ka yar tahay 18 sano oo aad codsatay magangalyada caalamiga ah;

3) joogitaanka xarun dadka lagu ilaaliyo ay khatar u keeni karto noloshaada ama caafimaadkaaga;;

4) Aad rabshad kala soo kulantay wadankaagi ama muddadii aad u soo socotay Poland.

Sababta laguu geynayo xarunta dadka lagu ilaaliyo ayaa ah mid ku salaysan go'aan maxkamada. Inta ay socoto dacwada maxkamada, u sharax garsooraha:

- da'da aad jirto,
- sababta aad u imaanayso Poland,
- hadii aad haysato dukumentiyo, haddii aadan haysanin sharax wixii ku dhacay,
- haddii aad horey ula soo kulantay rabshad,
- haddii aad qabto dhibaatooyin caafimaad,
- haddii aad rabto inaad magangelyo caafimaad ka hesho Poland,
- haddii qof qaraabo aad tihiin uu kuu joogo Poland ama wadan kale oo Yurub ka tirsan,
- ka codso maxkamda inay qareen kugu meelayso.

Haddii ay maxkamaddu go'aansato inay ku geyso xarun oo aad khilaafto, waxaad haysataa oo aad ku xeraysato rafcaan. Waxaad ku qori kartaa afkaada hooyo: **7 MAALMOOD** maxkamada ayaa turjumi doonta. Racfaankaaga, ku qor magaca maxkamadda xoriyada kaa qaaday.

icj European Institutions (ICJ-EI)
aditus accessing rights
Фондация за достъп до права – Foundation for Access to Rights
HELSINKI FOUNDATION FOR HUMAN RIGHTS
FORUM Human Rights
DÉFENSE DES ENFANTS INTERNATIONAL BELGIQUE
GREEK COUNCIL FOR REFUGEES
Funded by the European Union

Haddii...


aad tahay tahay ilmo
(aad jirto 18 sano jir ama aad ka yar tahay);

sababta aad u imaatay Poland ay
tahay inaad ka soo carartay wadankaad ama gurigaaga;


aad imaatay adigoona aysan kula
soconin waalidkaa ama qof kaloo sharciyan masuul kaa ah
tusaale ayeeyo ama awoowe, adeer;

ay ku qabteen
Ciidanka Xuduudka;

markaas warqadan daabacan adigaa laguugu talagalay!




## MUHIIM: HABRAACA LAGU GO'AAMIYO DA'DA



Haddii sababta lagugu hayo ay tahay inaadan wadanin baasaboor, hubi inaad tustid Ciidanka ilaaliya Xuduudka iyo maxkamadda dukumeenti kasta, nuqullo kasta, ama sawirro kasta oo xaqiijinaya da'daada.

Haddii dukumentiyada laga shikiyo, Ciidanka Ilaaliya Xuduudka ayaa kuu gudbin kara dakhtar soo qiimeeyo da'daada. Xusuusnow inaad xaq u leedahay inaad ku hesho macluumaad dhamaystiran afkaaga hooyo oo ku saabsan waxa dhacaya iyo ujeedada habraaca caafimaadka.

Haddii taariikhda dhalashada khaldan ay ku qoran tahay warbixinta xabsiga ama warqad kasta oo ay tahay inaad saxiixdo, la hadal ka hor inta aadan saxiixin oo weydii inay qoraan diidmadaada.

Dukumeenti kasta oo aad saxiixdo waa inuu ku qornaado taariikhda dhalashadaada saxda ah.

Haddii aad tahay ilmo, laakiin Ciidanka Ilaaliya Xuduudaha iyo maxkamaduhu ay kuula dhaqmaan sidii qof weyn, tani waxay xadgudub ku tahay xuquuqdaada.

## HUBI INAAD LA XIRIIRTO QAREENADA

## MA U BAAHAN TAHAY CAAWIMO?

Haddii aadan hubin xuquuqdaada, waxaad xaq u leedahay inaad la tashato qareen ama urur caawiya qaxootiga. Waxaad ka heli kartaa liiska halkan:

https://www.gov.pl/web/udsc-en/free-information-and-legal-assistance

Haddii aadan awoodin inaad qabsato qareen, u gudbi codsi maxkamadda si aad u hesho qof sharciga kugu matalo.
Sharax sababta aadan u qabsan karin qareen iyo in habraacyada sharcigu uu aad kugu adag yahay.

Haddii lagu galiyay xarun dadka lagu ilaaliyo oo aad rabto inaad codsato magangalyada caalamiga ah, ku ogeysii qolada maamulka xarunta qoraal ahaan sida ugu dhakhsaha badan.
Maxkamaddu waa inay markaas kuu qabataa kaaliye gaar ah, masuul.
Ka codso inaad xiriir la lahaato. Mas'uulkaagu waa inuu wax walba kuu sharaxaa isla markaana kaa caawiyo codsiga magangalyada caalamiga ah. Gaar ahaan, mas'uulka waa inuu u soo gudbiyaa codsigaaga magangalyada waana inuu goob joog ka ahaataa dhageysiga. Sida ugu dhakhsaha badan ee mas'uulkaagu u soo diro codsigaaga magangelyada, sida ugu dhakhsaha badan ayaad uga bixi kartaa xarunta lagu ilaaliyo dadka.

